

Calgary



# Vehicle for Hire



## WARBIXINTA #1

## DIB U CUSBOONAYSIINTA SHATIGA TAARIKADA LA HELI KARO/TAKSIGA

Maajo 2024

Muddada dib u cusboonaysiinta ee Shatiga Taarikada Taksiga (T.P.L.) iyo Shatiyada Tagaasida dadka Naafada ah (A.T.P.L.) ee 2024 waxay u dhexaysaa Juun 1 ilaa Juun 30.

Marka aan galno muddadan mashquulka badan, wakhtiyada sugitaanka ee xafiiska Vehicle-for-Hire wuxuu ka badan karaa wakhtigii caadiga ahaa waxaanna kaaga mahad celinaynaa dulqaadkaaga iyo fahamkaaga. Waxaan baaraynaa suurtagalnimada in hanaanka dib u cusboonaysiinta loo wareejiyo qaab onleen ah, laakiinse hadda, dib u cusboonaysiinta waa in lagu dhammaystiraa qaab fool ka fool ah iyadoo la tagayo xaafiiska Vehicle-for-Hire.

Xafiiska Vehicle-for-Hire (2340 – 22 Street N.E.) wuxuu furan yahay saacadaha u dhexeeya 8 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha si shatiyada dib loogu cusboonaysiiyo. Dadka taarikooyinka haysta waxaa la xasuusinayaa in ay la yimaadaan Shatiga darawalnimada ama Shatiga Darawalnimada Taksiga ee Gobolka Alberta oo sugan. Kharashka dib u cusboonaysiinta Shatiga Taarikada Taksigu (T.P.L.) waa \$495.

Livery Transport Bylaw waxaa ku xusan qodobu la xidhiidha muhiimadda ay leedahay dib u cusboonaysiinta T.P.L. ama A.T.P.L.

### Faqrada 35

(1) Haddii *T.P.L.* ama *A.T.P.L.* ay taariikhdiisu dhacdo oo aan codsi dib u cusboonaysiin ah lagu soo gudbin **30 maalmood gudahood marka uu dhaco**, intaas kaddib *T.P.L.* ama *A.T.P.L.* waxaa loo arkayaa mid laga maarmay xaqa qofku u leeyahay inuu dib u cusboonaysiiyana meesha waa laga saarayaa.

Waxa aanu u hanqal taagaynaa in aan ku aragno Juun. Fadlan wixii su'aalo ah noogu soo dir iimaylka [VFHlicensing@calgary.ca](mailto:VFHlicensing@calgary.ca)

Farriintan waxaa loo turjumay Amxaari, Carabi, Faransiis, Hindi, Bunjaabi, Soomaali iyo Urduu. Riix [halkan](#) si aad u aragto dokumentiyada.

Daacad kuu ah,

### Cory Porter

Guddoomiye Ku xigeenka, Vehicle for Hire  
Maaraynta Xaaladaha Degdega ah iyo Amniga Bulshadda